Bixiyaha

# Daryeelka Caruurta ee Qoyska

# TALOOYIN

ee ku socota

Waaxda Adeegyada Bulshada ee Kaalifoorniya

Luulyo ★ 2021

childcarelaw.org

# Talooyinka Bixiyaha Daryeelka Caruurta ee Qoyska

1da bishii Luulyo, 2021, dhammaan barnaamijyada daryeelka carruurta iyo kobaca ee ay maamusho Waaxda Waxbarashada ee Kaalifoorniya, marka laga reebo Barnaamijka Dugsiga Hore (Preschool) ee Gobolka Kaalifoorniya, waxaa loo wareejiyay Waaxda Adeegyada Bulshada ee Kaalifoorniya (CDSS). Kala wareejintan ku aaddan barnaamijyada daryeelka iyo kobaca carruurta ayaa CDSS da ku kallifay inay ka go'naato inay abuurto barnaamijyo daryeel iyo waxbarasho hore oo isku-duuban, oo loo siman yahay, oona lala xisaabtami karo barnaamijkaas oo bixiya natiijooyin wanaagsan ee loogu talagalay carruurta iyo qoysaska. Ka Qeybgelinta qoysaska iyo daryeel bixiyeyaasha xanaanada carruurta daneeyayaasha - muhiimka ah - ayaa qayb ka mid ah abuurista hanaankan.

Sidaa darteed, CDSS waxay qandaraas la gashay Xarunta Sharciga Daryeelka Carruurta (CCLC) iyo Iskaashatooyinka Cilmi baarista Sharciyada Bulshada (SPR) si ay u soo ururiyaan aragtiyada bixiyaha daryeelka caruurta ee qoyska ee gobolka Kaalifoorniya oo dhan. Talooyinka bixiyaha daryeelka caruurta ee qoyska, iyadoo lagu salaynayo waayo-aragnima-dooda iyo khibraddooda, waxay u horseedi doontaa caddaalad, sharciyo CDSS waxtar u leh.

Daryeel bixiyayaasha xanaanada ilmaha ee ka kala yimid dhaqamo, luqado, iyo taariikh nololeedyo kala duwan waxay hodannimo u keenaan xagga xirfadda - oo waa in dhammaantood la wada dhegeystaa oona si caddaalad ah loola dhaqmaa



# Dulmarka Kooxaha ka Qeybgalka ee Daryeel bixiyaha

**Daryeel bixiyayaasha xanaanada ilmaha oo ka kala yimid dhaqammo, luqado, iyo sooyaal aad u fara badan ayaa xirfadda ku soo kordhiya hodannimo - dhammaantood waa in la wada dhegeystaa oona si caddaalad ah loola dhaqmaa.**

CCLC iyo SPR waxay isu keeneen bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyska oo matalaya noocyo kala duwan ee jaaliyaddo, waaya-aragnimo, iyo qeybood oo afar kooxo ka qeybgal kala gooni ah ka kooban:

Madow, bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyska ee ku hadla luqadda Ingiriisiga

Shiinees, Kontoniis bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyska ee ku hadla Cantonese

Latina, bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha qoyska ee ku hadla af Isbaanish

Soomaali, bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha qoyska ee ku hadla afka Soomaaliga

CCLC waxay si ogsiimo ah ayay u samaysay afartaan kooxood si loo hubiyo in aragtiyaha iyo talooyinka bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ay ka bixiyaan bulshooyinka taariikh ahaan aan si siman loo wada matalin inay u noqdaan kuwo xuddun u ah warbixintan. Astaamaha muhiimka ah ee ka -qaybgalayaasha kooxda ka qeybgalaya ayaa waxaa lagu muujiyey Bandhigga I.

Hoggaamiyaha bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka oo ka soo jeeda beel walba ayaa daadihiyay kooxda la-tashiga si adeeg bixiyayaashu ay u dareemaan inaysan lur dareemin oo si xor ah ugu hadlaan iyo iyaga oo ku hadalaya luqad aysan lur ku qabin. SPR waxay qoraal ka samaysay wada-hadalladii waxayna u qortay qoraal kasta “mawduucyo muhiim ah”.



# Hab


Koox kasta ee ka qeybgalaysa waxaa la joogay daadihiye koowaad oo ka tarjumaya dhaqan nololeedka/isirka qowmiyadda iyo luuqadda ay ku hadlaan daryeel bixiyeyaasha ka qaybgalaya. Inta waxaa dheer, iyadoo oggolaansho laga heyso daryeel bixiyeyaasha, koox kasta ee kooxda ka qeybgalaysa hadalkooda waa la duubay oona waa la qoray. SPR waxay qoraal kasta u qoratay qaab mawduucyo muhiim ah ee la xiriira asalka qoysaska ee qoysaska ay daryeel bixiyayaasha daryeelka u fidiyaan, taageerada daryeel bixiyayaasha u fidiyaan, meelaha taageerada muhiimka ah ee looga baahan yahay gobolka, iyo talooyinka CDSS. Warbixintani waxay soo koobaysaa mawduucyadan muhiimka ah iyo talooyinka ay soo jeediyeen dhammaan afarta kooxood ee kooxaha ka qeybgalay. Wixii faahfaahin dheeraad ah iyo xigashooyinka daryeel bixiyeyaasha laga soo ururiyey ee kooxha ka qeybgalay, fadlan tixraac qoraallada lagu Lifaaqyada lagu qoray.



Ka -qaybgalinta macnaha ku fadhiya daryeel bixiyayaasha waxay wax ka bedeshaa sharciyada, kartiyada bulshooyinka, oo waxayna horseedaa isbeddel wayn ee dhanka bulshada.

## 9


### MADOW
### DARYEEL BIXIYAYASHA XANAANADA ILMAHA EE QOYSKA



Kooxda la-Tashiga
waxaa lagu qabtay luqadda
**Ingiriiska**

**DEEGAANKA**

| | |
|---|---|
| Los Angeles | 33% |
| Alameda | 45% |
| Contra Costa | 11% |
| Riverside | 11% |



**YAR AMA WEYN HOY DARYEELKA CARRUURTA**

| | |
|---|---|
| Yar | 44% |
| Weyn | 56% |

**AQBALA QOYSASKA KAALMADA WATA**

**100% HAA**

---

## 7

### LATINA
### DARYEEL BIXIYAYASHA XANAANADA ILMAHA EE QOYSKA



Kooxda la-Tashiga
waxaa lagu qabtay luqadda
**Isbaanish**

**DEEGAANKA**

| | |
|---|---|
| Alameda | 43% |
| Santa Clara | 14% |
| Imperial | 29% |
| San Diego | 14% |



**YAR AMA WEYN HOY DARYEELKA CARRUURTA**

| | |
|---|---|
| Yar | 64% |
| Weyn | 36% |

**AQBALA QOYSASKA KAALMADA WATA**

**100% HAA**

## 14

### SHIINEES
### DARYEEL BIXIYAYASHA XANAANADA ILMAHA EE QOYSKA

Kooxda la-Tashiga waxaa lagu qabtay luqadda **Cantonese**

**DEEGAANKA**

| | |
|---|---|
| San Francisco | 57% |
| Alameda | 36% |
| Los Angeles | 7% |

**YAR AMA WEYN HOY DARYEELKA CARRUURTA**

| | |
|---|---|
| Yar | 64% |
| Weyn | 36% |

**AQBALA QOYSASKA KAALMADA WATA**

71% HAA 29% MAYA

---

## 15

### SOOMAALI
### DARYEEL BIXIYAYASHA XANAANADA ILMAHA EE QOYSKA

Kooxda la-Tashiga waxaa lagu qabtay luqadda **Soomaaliga**

**DEEGAANKA**

| | |
|---|---|
| San Diego | 100% |

**YAR AMA WEYN HOY DARYEELKA CARRUURTA**

| | |
|---|---|
| Yar | 60% |
| Weyn | 40% |

**AQBALA QOYSASKA KAALMADA WATA**

100% HAA

# Hirgelinta Caddaalad Luuqaddeed

**Marka luqadda uu heli karo qof kasta oo ka qaybqaata xanaanada carruurta - carruurta, qoysaska, iyo daryeel bixiyayaasha ayaa ka wada faa'idaysanaya ama kobcaya.** Ma aha in qofna la dhaafo ama laga soo tago. Caddaalad luuqaddeed waxay micnaheedu tahay "garashada cabbir bulsho iyo mid siyaasadeed ee luqadda iyo helida luqadda, iyadoo laga shaqeynayo in la kala dhig-dhigo carqaladaha ka jira dhanka luqadda, is-barbar dhigidda awoodda firfircoon, iyo dhisidda bulshooyin xooggan ee caddaalad iyo isir." [1] Habka caddaaladda luqaddu waxay taageertaa oo dhistaa meelo badan oo ku hadla afafka kala duwan oo waxayna hubisaa in bulshooyinka oo dhan ay leeyihiin fursad siman iyo helitaan loo siman yahay — iyadoon loo eegayn luqadda - si loo wargeliyo sharciga iyo horumarinta barnaamijka.

Daryeel bixiyeyaashu waxay nala wadaageen talooyinka soo socda ee ku saabsan sida habka caddaaladda luqadda loogula dhaqmi karo bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka:

**Hubi in turjumaad iyo fasiraad loo wada fidiyo dhammaan qoraallada ka imaanaya CDSS iyo ka-qaybgelinta daneeyayaasha.** CDSS ma aha kaliya in ay hubiso in dhammaan qoraallada iyo xogta bogga internetka ku jirta ay ku qoran yihiin ama lagu heli karo luqaddo dhowr ah (oo ay ku jiraan luqadda Kantoniis iyo af Soomaali), laakiin sidoo kale la hubiyo in dhammaan kullamada internetka lagu bixiyo iyo shirarka dadweynaha ee khuseeya ay leeyihiin turjumaad ku filan si dhammaan daryeel bixiyeyaasha ku hadla luqad kasta ay si firfircoon uga qaybqaataan.

Talo soo jeedintan ayaa lagu taabtay dhammaan afarta kooxood ee ka qeybgal, gaar ahaan kooxaha ka qeybgalka ee Shiinaha iyo Soomaalida.

**Hubi in dhammaan ilaha iyo qoraallada loogu talagalay qoysaska loogu turjumay luqaddaha Kantoniiska iyo afka Soomaaliga.** Bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ee Soomaalida iyo Shiineeska waxay halka ka sheegeen inay qaataan qoraallada iyo dukumintiyada la turjumay si qoysaska carruurta leh ee iyagu ay caawiyaan ay u codsadaan manfacyada CDSS ay bixiso. Qoysaska uma baahna inay isku haleeyaan daryeel bixiyayaasha xanaanada ilmaha oo ay ka sugaan taageeradaan haddii dhammaan qoraallada CDSS ay bixiso loogu turjumo afka Soomaali iyo afka Kantoniiska.

**Kordhi akhrinta qoraallada CDSS ay soo qoraan.** Gaar ahaan, bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka Latina waxay ku taliyeen in la fududeeyo luuqadda iyadoo la dhimayo tirada soo gaabinta iyo in la yareeyo waxyaabaha ku jira PIN-yada si diirada loo saaro qodobbada ugu waaweyn.

**PIN-yada iyo iimeellada ugu fidi luuqado badan si loo daboolo baahiyaha luqadeed ee ay qabaan dhammaan daryeel bixiyeyaasha oo dhan**. Bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyska ee Shiineeska iyo Soomaalida waxay noo sheegeen inay mahadcelin ay ugu hayaan in PIN lagu soo qoro luuqadooda.

**Ka qaybgali daryeel bixiyeyaasha ka soo jeeda bulshada Asian American Pacific Islander (AAPI).** Bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ee Kantaniiska waxay soo jeediyeen talooyin ka qelin oo gaar ah oo loogu talagalay bulshada AAPI. Mid ka mid ah wuxuu nala wadaagay in CDSS ay tahay inay aqoonsato in bulshada AAPI ay ka kooban tahay kooxo badan oo kala duwan oo aan baahidoodu ahayn in hal koox laga dhigo. Aragtida daryeel bixiyayaasha ku hadla Kantoniis guud ahaan ma matalaan bulshada AAPI, baahidooduna way ka duwanaan kartaa kuwa daryeel bixiyayaasha Aasiyada Koonfureed ama Filibiinta, tusaale ahaan. Intaa waxaa dheer, CDSS waxay si toos ah u gaarsiin kartaa daryeel bixiyeyaasha AAPI oo kala duwan si ay uga qaybqaataan u doodidda oo si macno leh ugu daraan hanaanka dejinta sharciyada.

1. Bulshooyin Abuuraya Deegaanno Caafimaadaysan (Communities Creating Healthy Environments (CCHE)), Aalad Caddaaladda Luuqadda, 2 (2012), https://www.thepraxisproject.org/resource/2012/languagejustice.

# Ku daris Daryeel Bixiyayaasha Xanaanada Ilmaha Go'aan ka Gaarida

**Ka qeybgalka wax ku oolka ah ee daryeel bixiyayaasha waxay beddelaan xeerarka, waxayna xoojiyaan bulshooyinka, oo waxayna dhaliyaan isbeddel weyn ee bulshada ah**. Qorshaha kala Gudubka CDSS wuxuu sheegayaa in CDSS "ay sii wadi doonto ka qeybgelin wax ku ool leh oona si joogto ah ula shaqeeya daneeyayaasha." Daryeel bixiyeyaashu waxay matalaan koox daneeyayaal oo CDSS muhiim ugu ah si ay si joogto ah ay ugu qeybgalaan. Dhageysta daryeel bixiyayaasha oo ay ku jirtao waayo-aragnimada si loogu wargeliyo kobcinta horumarinta sharciga iyo xoojinta xirfadda ayaa taageeri doonta dada-allada CDSS ay ugu jirto in sinnaan udub looga dhigo barnaamijyadeeda.

*Waxay u egtahay in rag xiran shaarar cad iyo taayo ay meel ku wada kulmeed oo ay yiraahdaan, tani waa waxa aan dareem-eyno in daryeel bixiyayaasha xanaanada ilmaha u baahan yihiin … maalintii waxaan haysanaa 12-saacadood, mararka qaarkood lix ama toddoba maalmood toddobaadkii, oo ka dibna waxay kugu soo riixayaan waraaqaha iyagoo kugu dhahaya, "haddii aad doonaysid in $2,000 oo bishiiba ah oo madaxaaga ka laalaado, sare u bood. Sare u bood."*



Daryeel bixiyayaasha awood u sii sidii loogu wargeliyo sharciyada xanaanaynta ilmaha la xiriira

**Daryeel bixiyeyaashu waxay nala wadaageen talooyinka soo socda ee ku saabsan sida wax ku oolka leh ee loogu hawlgeliyo bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka.**

**Daryeel bixiyayaasha awood sida loogu wargeliyo sharciyada xanaanaynta ilamaha.** CDSS waa inay abuurtaa koox lataliye ee bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ah oo si joogto ah u kulma si ay u taageeraan CDSS iyadoo la samaynayo sharciyo lagu wargeliyay khibrad nololeedka. Ka qaybgalkan joogtada ah ee daryeel bixiyeyaasha iyo aqoonsashada khibradooda ayaa hagaajin doonta xirfadda takhasuska laantan oo waxayna si rasmi ah u aqoonsan doonaan bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka sida barayaal oo kale.

# Fuli Wacyi-gelin ku socota Daryeel Bixiyayaasha

Wadahadal wanaagsan ayaa ah farqiga u dhexeeya jahwareer iyo hadal cad. Dhammaan kooxaha ka qeybgelinta, daryeel bixiyayaasha ayaa nala wadaagey in aaladaha wakaaladda ee loogu talagalay wadaagida xogta ay ku adag tahay in la maareeyo. Tani waxay ku adkeyneysaa daryeel bixiyayaasha xanaanada ilmaha inay su'aalahood ay jawaabo u helaan.  CDSS waxay wanaajn kartaa faafinta xogta marka ay cusboonaysiiso boggeed internetka iyo ilaha iyada oo qayb ka ah kala gudubka. Tani waxay kobcin doontaa dhaqanka isla xisaabtanka oo waxayna si fiican ugu adeeggi doontaa daryeel bixiyayaasha xanaanada ilmaha iyo qoysaska.

**Daryeel bixiyeyaasha ayaa waxay nala wadaageen talooyinka soo socda si loo hagaajiyo isgaarsiinta CDSS**

*Websaytka loogu talagalay waxbarashada ee CDE aad baa loogu jahwareeyaa. Sidaas darteed, isku dayga in la helo xog gaar ahaan ku saabsan bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ayaa ahaa arrin meesha taala. Isku dayga in la ogaado halka loo aado deeqaha, xodka ku saabsan deeqa-ha, qalabka PPE ga, isku dayaya in la helo wax [xog] oo ee arrinkan, waxay ahayd... Waan iskaga quustay. Aniga ayaa baxa oo wax walba keligay soo iibsada.*

**Qoysaska oo dhan ku wargeli dhammaan xulashooyinka iyo manfacyada ay u qalmaan.** Daryeel bixiyayaasha xanaanada ilmaha ee qoyska madow waxay nala wadaageen in marka qoysasku ay raadsadaan adeegyada taageerada, qaar badan intooda ka mid ah aanan loo sheegin inay xaq u leeyihiin adeegyada daryeelka carruurta, ama adeegyadan ay qaadan karto 60 maalmood in la meel mariyo taas oo qoysaska ka horjoogsan karta inay si dhab ah u raadsadaan adeegyo.



**Si cad ula xiriirida kabka xanaanada ilmaha iyo xeerarka ruqsad bixinta daryeel bixiyeyaasha iyo waalidiinta.** Dhammaan kooxaha ka qeybgelinta, daryeel bixiyeyaashu waxay nala wadaageen inay waalidiinta ay ka caawiyaan mariin u helida daryeelka carruurta ee ay dawladdu maalgeliso, laakiin xeerarku waa kuwo jahawareer laga qaado oo badanaaba isbedela.

**Hagaajinta marin u helida, iyo hagidda, Falanqeeyayaasha Barnaamijka Ruqsad bixinta**. Dhammaan daryeel bixiyeyaasha oo dhan ee kooxaha ka qeybgelinta waxay nala wadaageen sharciyada caafimaadka iyo badbaadada - tusaale ahaan, shuruudaha badbaadinta dabka - in ay yihiin kuwo aan is -waafaqsanayn oo lagu jahawareero. Daryeel bixiyeyaashu waxay jeclaan la'haayeen xeerar isku wada mid ah (kuwaas oo ah, xeerarka badbaadada dabka) kaas oo si cad u sheegaya waxa ay tahay inay sameeyaan si ay u buuxiyaan heerarka caafimaadka iyo dabka.

**Si cad loogu sheego da'da u dhaxeysa ee loogu talagalay carruurta sabiga ah iyo kuwa socod-baradka.** Bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ee Latina waxay nala wadaageen in kala soocidda da'da ilmaha iyo kuwa socod baradka ay tahay mid lagu jahawareersan yahay oo dowladda gobolka ay tahay inay tilmaan cad ah ay ka bixiyaan.



**In la adeegsado melo kala duwan oo lagu wadaago Ogeysiisyada Xogta Daryeel Bixiyayaasha (Provider Information Notices) (PIN).** Daryeel bixiyeyaasha waxay nala wadaageen inay jeclaan la'haayeen inay PIN ka ay ku helaan qaab iimeel ah, dhanka boostada, farriimaha qoraalka, iyo isgaarsiinta tooska ah ee uga timaada Falan-qeeyayaasha Barnaamijka Ruqsad Bixinta (LPAs) ama wakiillada kale ee gobolka/degmada.

**La sameeyo shabakad dhexe ee internet oo loogu talagalay bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka. Daryeel bixiyayaasha xanaanada ilmaha ee qoyska madow waxay nala wadaageen in nooca macluumaadka ee aadka dadka u caawin la'haa ay tahay shabakad dhexe ee internet oo ay ka mid yihiin:**

- Xiriiriyeyaal (links) shaqeeya ee Ururada Daryeelka Carruurta ee Kalifoorniya (California Child Care Associations)
- Xog ku saabsan sida looga qaybqaato ururrada daryeelka carruur
- Meel toos ah oo lagula sheekaysto oo si toos ah su'aallo lagu waydiin karp LPA
- Xog ku saabsan tababbarka iyo fursadah horumarinta xirfadeed ee gobolka oo dhan ah
- Aalad internetka looga raadiyo ee loogu talagalay daryeel bixiyayaasha si ay u raadsadaan xog daryeel bixiyaha u gaar ah
- Qaamuus yar ee eray-bixin ah ee dhammaan erayada caamka oo laga helo nidaamka daryeelka carruurta
- Xog ku saabsan ilaha daryeel bixiyayaasha, sida Xarunta Sharciga ee Daryeelka Carruurta (Child Care Law Center)
- Liiska taleen lambarrada waaxyada iyo ururrada (tusaale, CalWORKs) ee daryeel bixiyayaasha khuseeya
- Xog sharci oo ku saabsan xeerarka iyo shuruudaha guryaha daryeel bixiyaha carruurta qoyska
- Xog ku saabsan sida looga jawaabbo eedeymo kasta ama arrimo kale oo sharci oo ku aadan mid daryeel bixiyaha la xiriira
- Xog ku saabsan hababka ugu wanaagsan ee ganacsiga (tusaale ahaan, xereynt canshuuraha sida bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka)
- Xisaabinta sicirka ee dayreel bixiyayaasha la shaqeeya qoysaska isticmaala kaalmada daryeelka carruurta

# Taageerada Daryeel Bixiyayaasha Xanaanada ilmaha ee ka soo Kabanaya cudurka Saf marka ee COVID-19

Cudurka saf marka ayaa muujiyay sida daryeelka ilmaha uu daruuri u yahay. Daryeel bixiyeyaashu waxay na la wadaageen in, cudurka saf marka darteed, ay daryeelayaan carruur badan oo dugsiileey ah, iyaga oo ku kaalmaynaya waxbarashada qatka lagu bixiyo, iyadoo kor u qaadaya nadiifinta iyo nadaafaddooda, maaraynta is-qoritaanka is-bedbeddelaya, iyo hirgelinta xeerarka caafimaadka dadweynaha ee sida joogtada ah isu beddelaya.

*Cudurka COVID-19 wax walba wuu beddelay. Deeqda aan helnay hal maalin xitaa kuma filna. Waa inaan si adag u shaqeynaa si aan uga hortagno faafitaanka cudurka. Waa inaan mar walba nadiifinnaa meel kasta - musqulaha, jikada, qolalka fadhiga iwm. Hal mar, waxaan aaday Restaurant Depot si aan u soo iibiyo agabkii nadiifinta oo rasiidkii meel ayaan dhigtay, maxaa yeelay waxaan rabaa inaan meel ku dhejiyo si aan u tuso inta aan ku bixinno agabka nadaafadda iyo sida COVID-19 u beddelay qaab nololeedkeenna.*



**Qorshaha Kala-guurka CDSS wuxuu garawsan yahay baahida loo qabo in la sii wado wax ka qabashada masiibada COVID-19. Daryeel bixiyeyaashu waxay wadaageen in CDSS ay ka taageeri karto caqabadaha la xiriira masiibada ayna uga taageeri karto siyaabaha soo socda:**

**Samee jadwal cad oo ku saabsan sharciyada badbaadada ee la xiriira masiibada oo bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ay kula xiriiri karaan qoysaska.** Tilmaanta CDSS ee COVID-19 oo si joogto ah is-beddelaya iyo sharciyada degmada oo aan caddayn ayaa ku adkaynaysa qof walba inuu fahmo. oo raaco xeerarka la dejiyay.

Arinkan ayaa si gaar ah u caddeeyay bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ee Shiineeska. Sharci iyo tilmaamo cad oo ka timaada dowladda gobolka ayaa ka caawin doonta daryeel bixiyeyaasha inay hagaan waxa ay tahay borotokoollada la dejinayo oo la meelmarinayo.

**Bixi deeqo dhaqaale oo loogu talagalay ka soo kabashada masiibada.** Daryeelbixiyayaasha waxay wadaageen in deeqahaasi ay heli karaan daryeel bixiyeyaasha, iyadoon loo eegayn halka ay ku sugan yihiin ama ilaha lacag bixinta qoyska. Waxaa intaa dheer, arjiyada waa in ay la socdaan hab caddaalad ah ee dhanka luqadda iyaga oo hubinaya in lagu turjumo luuqado badan (sida lagu sharaxay Qeybta 1).

**U fidi ilaha daryeel bixiyeyaasha si ay u daboolaan kharashaadka sahayda la xiriirta masiibada.** Daryeel bixiyeyaasha waxay u baahan yihiin sahay nadiifin oo dheeraad ah iyo qalab la isaga difaaco si ay uga soo baxaan shuruudaha xeerarka caafimaadka iyo badbaadada. Daryeel bixiyeyaasha ayaa sidoo kale u baahan taageero si carruurta waxbarashada ku qaata dhanka internetka waxyaabaha waxbarashada ee ay u baahan yihiin sida kombiyuutarka dhabta, kombiyuutarka gacanta iyo fiilooyinka lagu buuxiyo.

**Si masiibada looga bogsoodo, daryeel bixiyeyaasha waxay u baahan yihiin taageero si diiwaangelinta loo kordhiyo.** Daryeel bixiyeyaasha waxay nala wadaageen in hal dariiqo oo kor loogu qaadi karo diiwaangelinta ay tahay in la cusbooneysiiyo qeexidda da'da ee dhallaanka sabiga iyo dhallaanka socod-baradka; dhallaanka sabiga waa in lagu qeexaa 18 bilood jir iyo wixii ka yar, halkii uu ka ahaan lahaa 24 bilood jir iyo wixii ka yar. Tani waxay daryeel bixiyayaasha ay u oggolaan inay diiwaangeliyaan carruur badan ee barnaamijyadooda. Intaa waxaa dheer, dowlada gobolk wuxuu xiriir wanaagsan ee taageero uu dhexmari karaa R&Rs iyo daryeel bixiyeyaasha si ay gacan uga geystaan hubinta barnaamijyada xanaanada ilmaha inay yihiin kuwo si buuxa u hawlgala inuu yahay.

# Daryeel Bixiyayaasha Xanaanada Ilmaha u Fidi Horumarin Xirfadeed

Bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka badankood waa haween midab leh ah kuwaas oo adeeg bulshada muhiim u ah u qabta. Waxay bixiyaan daryeel diirran, kobcin, daryeel wax ku ool ah, oo badiyaa daryeelka ku bixiya luuqadda guriga loogu hadlo ilmaha ku siiya taas oo ay weheliso dhaqan waafaqsan ilmaha adeegga loo fidiyo. Qorshaheeda Kala-gudubka, CDSS waxay ku dhawaaqaysaa in "dadaallo lagu bixin doono si loo fududeeyo looguna daro casharro horumarin xirfaddeed oo in lagu daro nidaamyada jira" oo waxaa la qaadi doonaa "tallaabooyin si loo hubiyo wadahadalka heerka maxalliga ah ee u dhexeeya hay'adaha tababbarka, adeegyada maxalliga ah iyo daryeel bixiyeyaasha si loo hubiyo go'aan loo dhan yahay samaynta iyo bixinta xogta ugu sarreeya ee dhammaan daryeel bixiyeyaasha xanaanada ilmaha si ay uga qeybgalaan fursadaha horumarinta xirfadeed ee ku habboon."

Dhammaan afarta kooxood ee kooxaha ka qeybgala, daryeel bixiyeyaasha waxay nala wadaageen inay rabaan fursado horumarin oo xirfadeed si looga caawiyo inay si wanaagsan ugu adeeggaan dhammaan carruurta iyo qoysaska ku jira daryeelkooda. Sidaas darteed, iyadoo CDSS ay eegayso hagaajinta fursadaha horumarinta xirfadda, daryeel bixiyeyaasha ayaa nala wadaagay talooyinka soo socda ee CDSS si ay uga caawiyaan horumarinta xirfadeed oo joogto ah.



*Hagaag, dhibaatada jirta ayaa waxay tahay in fasallo badan oo la bixiyo ayaa waxay ku wajahan yihiin xarumaha... Aniga waxaan xiriir aad u soke iyo xiriir soke ee shaqsiyadeed ayaa waxaan la leenahay qoysas badan, marka waxaan u baahanahay barnaamij anaga la noogu talagalay. Kaas oo ah midda anigu iigu muhiimsan, sababtoo ah anigu waxaan ka hadlaa kala duwanaanshaha iyo ka mid noqoshada [gaar ahaan qoysaska guryaha yaryar] ee daryeelka ilmaha, maxaa yeelay tababbarka kala duwanaanshaha ayaa had iyo jeer waxaa laga soo jeediyaa qoysaska [xarumaha] waa weyn. Laakiin anagu ma nihin kuwo weyn. Anagu ma samayn karno isla sheyga ay xaruntu samayso. Anagu noo ma joogaan qof u heellan ka -qaybgalka qoyska ama ka caawinta arrintaas. Wax walba anagaa ayaa qabsana.*




**Daryeel bixiyeyaasha u fidi fursado waxbarasho si ay u helaan shahaado sare.** Daryeel bixiyeyaashu waxay nala wadaageen inay si joogto ah u raadinayaan si u wanaajiyaan xirfadahooda iyo aqoontooda si ay si wanaagsan ugu adeegaan carruurta ku jirta daryeelkooda. Daryeel bixiyeyaasha qaarkood, tani waxay macnaheedu tahay fursad ay waxbarashadoodu ku sii wadan karaan.

**Dib u eeg ku Samee Nidaamka Hagaajinta Qiimeynta Tayada (Quality Ratings Improvement System (QRIS)) si ay ugu habboonaato bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka.** Daryeel bixiyeyaasha ayaa nala wadaagay in QRIS-ta hadda jirta aysan ka turjumayn xaaladda daryeelka carruurta ee qoyska, sidaas darteed manhajka waa in dib u eegis lagu sameeyaa. Bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ee ka tirsan QRIS waxay jeclaan la'haayeen inay hoos u dhigaan waraaqaha iyo inta jeer ee la cusbooneysiiyo.

**In la abuuro xog ku saabsan qaybha dadweyna ee qoysaska iyo daryeel bixiyayaasha bulshooyinka ee daryeelka loo fidiyo.** Gaar ahaan, daryeel bixiyeyaasha Latina waxay nala wadaageen inay jeclaan la'haayeen xog ku saabsan qaybaha dadweynaha marka loo eego summada boostada (zip code), luuqadda, isirka iyo qomiyadda (mid la mid ah tirakoobka) oo ku saabsan qoysaska bulshadooda dhexdiisa adeegga loogu fidiyo. Daryeel bixiyeyaashu waxay soo jeediyeen in macluumaadkan ay wadaagi karaan daryeel bixiyeyaasha (iyadoo ay la socoto heshiis asturnaan) oo na lagu qorayo bogga internetka ee CDSS.

**U fidi meel loogu talagalay hubin fayoqab iyo taageero la isla wadaago.** Daryeel bixiyeyaasha - gaar ahaan daryeel bixiyeyaasha Madowga iyo Soomaalida - waxay wadaagayaan in labaduba ay u baahan yihiin meelo iyo tababbar ay ku maareeyaan walaaca iyo giigsanaata la xiriira daryeelka ay bixinayaan la socda. Waxay si joogto ah ay u muujiyeen inay la kulmaan oo ay markhaati u noqdaan cadaadiska ama taraamada xagga shaqadooda ha sidaas darteedna ay ugu baahan yihiin taageero maareynta cadaadiska shaqada. In kasta oo bixiyeyaasha qaarkood ay sheegeen inay ka qaybgaleen tababbaritaanno la xiriira meheradda si ay u taageeraan meheraddooda daryeelka carruurta, ma aanay helin wax tababbarro la xiriira maareynta cadaadiska ama taraamada.

**U fidi fursado waxbarasho oo loogu talagalay bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka taasna waxay ka taageertaa daryeelka loogu talagalay dhammaan carruurta o dhan.** Daryeel bixiyeyaasha waxay na la wadaageen in xaaladda daryeelka carruurta qoyska ay ka duwan tahay tan xarumaha daryeelka carruurta. Tababbarku waa inuu u dhigmaa macnaha guud. Waxaa intaa dheer, tababbarku waa inuu noqdaa mid ay ku jiraan baahiyaha carruurta la kulma taraamada, qaba baahiyaha gaarka ah, iyo heerar kala duwan oo bulsheed iyo shucuureed.

**Dhammaan afarta kooxood ee kooxaha ka qeybgalaya, daryeel bixiyeyaasha waxay na la wadaageen inay rabaan nidaam daryeel ilmeed oo xushmeynaya xirfaddooda iyagoo ku daraya khibraddooda oo ku taageeraya sida barayaal iyo barbaariyaal oo kale. Waxaan rajeyneynaa inaan la shaqeyno CDSS si aan u hirgelino talooyinka warbixintan ku jira si aan u abuurno nidaam daryeel carruur oo qoysas, kaas oo carruurta iyo daryeel bixiyayaasha xanaanada ilmaha ay ka wada faa'idaysan doonaan.**

*Markii ugu horraysay [dowladda gobolka] ay bilawdaay [daryeelka carruurta qoyska], waxay dhihi jireen, "Oh, waxa kaliya aad u baahan tahay in aad haysato shahaado dugsiga sare." Wali waxay noola dhaqmayaan sida in anagu aan dad carruurta haya oo kale halkii ay ka ahaan la'hayd sida kale xaqiiqda waxay tahay anaga inteena badan waxaan nahay dad horey waxbarasho u soo qaatay. Waxaan ka soo shaqeynay guryaha. Tan hore ayaan u soo qabanay, ama laga yaabee in waalidkeen horey ay u soo qabteen. Waxaan soo marnay xarumo, oo ma noola dhaqmayaan sida dadka xirfadlayaal ah. Waxay noola dhaqmayaan sidii dad howsha ku cusub oo kale. Markaa inta muddo ee howshan gacansi aad ku soo jirtay, weligood wax iska ma beddelaan sida ay kuula dhaqmayaan iyo waxay ku siiyaan, iyo adeegyada ay bixiyaan, maxaa yeelay waxay markasta ay kuula dhaqmayaan sida inaad tahay qof haysato shahaadada dugsiga sare kaliya oo aaddan wax qibrad ah aaddan u la'hayn.*



# Adeegyada Midaysan ee loogu talagalay Manfacyada, Caafimaadka, Daryeelka iyo Dhaqaalaha

Daryeel bixiyeyaasha waa in loola dhaqmaa sida xirfadlayaal oo kale iyagoo kasbanaya mushahar iyo manfacyo ka tarjumaya aqoontooda, waaya-aragnimadooda, iyo kartidooda. Daryeel bixiyeyaashu waxay nala wadaageen talooyin loogu talagalay isbeddelka nidaamyada muddada-dheer. Qorshahan ka Gudubka, CDSS waxay sheegaysaa in “hadafyada barnaamijka muddada dheer iyo xeerara -ku-saleysan ee is-beddelkan ay ku dhisan yihiin fikradda daryeelka isku-dhafan ee carruurta iyo nidaamka kobaca,” oo ay ku jirto “sinnaanta, caddaaladda, iyo dhammaan qaabka loola wajahayo ilmaha/habka qoyska ee xarunta guud ahaan ” Habkan oo dhan ee ilmaha/habka qoyska ee guud ahaan wuxuu aqoonsan yahay baahida ilmaha iyo baahida waalidka ee si gooni iyo mid wadajir ahba.

Daryeel bixiyeyaashu waxay taageero aad u ballaaran ay siiyaan qoysaska iyo carruurta ay gacanta ku hayaan ee ay daryeelayaan oo waxayna udub-dhexaad u yihiin qaabilaada ubadka/qoyska oo dhan. Sida lagu xusay koox kasta ee qeybgalaysay, daryeel bixiyeyaashu waxay na la wadaageen inay qosaska ay wax u qabtaan oo buuxiyaan bahiyaha aasaasiga ah sida xafaayadda, cuntada, caanaha, gaadiidka, dharka, iyo agabka dugsiga. Waxay qoyaska ay caawiyaan inay la maareeyaan ballamaha laanta socdaalka, oo carruurta qaba baahiyaha gaarka ah ay taageeraan, iyo inay ka caawiyaan arjiyada shaqada iyo ballamaha caafimaadka.

*Adeegyadan oo dhan ayaan kalyantiyadeena u qabanaa. Waan ognahay in hawshayadu ayna waxba khusayn ballamahooda dhakhtarka iyo waraaqaha ay ka heleen hay'adaha guriyaynta iyo samafalka, qaarkood ayaa waxay na waydiistaan caawimo, in la geeyo [Adeegyada Waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadda ee Maraynka] iyo ballamaha dhakhtarka iyo waxyaabahaas oo kale. Maadaama, inta ugu badan, [waxaan u adeegnaa] muhaajiriinta cusub oo laga yaabo in aanay la’hayn ama marin u heli karin nooc kasta oo gaadiid ah. Sidaa darteed, waxaan iyaga u fidinnaa taageero aad u badan.*

Maadaama CDSS ay maamusho barnaamijyo badan oo loogu talagalay qoysaska, waxaa jirta fursad ah in la isku middeeyo barnaamijyo iyo adeegyo badan. Tani waxay taageeri doontaa daryeel bixiyayaasha xanaanada ilmaha, qoysaska, iyo carruurta. Daryeel bixiyeyaasha ayaa jeebka ka bixin doona wax yar si ay u taageeraan qoyska qaba baahiyaha aasaasiga ah sida cuntada iyo gaadiidka.



**Ku dar ujrooyinka qoyska ee kabka bixinta lacagta.** Daryeel bixiyeyaasha dhammaan afarta kooxood ee ka qeybgalay waxay na la wadaageen in inta badan aysan qoysku ku soo dalacayn ujrooyinka, iyagoo garwaaqsan in qoysaska ay u adeegaan aysan awooddin inay iska bixiyaan. Daryeel bixiyeyaasha waxay xiriirro soke ay la yeeshaan qoysaskooda oo waxay fahamsan yihiin caqabadaha ay wajahayaan waalidiintooda intooda badan. Sidaas awgeed, daryeel bixiyaal badan ayaan rabin inay weydiistaan ujrooyinka qoyska oo waxay u dhammaadaan in iyagu la haraan iyo/ama qoysaska ay weydiistaan gacan ka geystaan ganacsiga daryeelka carruurta ee daryeel bixiyayaasha oo qaab kale ay gacan uga geystaan. Tusaale ahaan, daryeel bixiyeyaasha Madowga ah waxay na la wadaageen in qoysasku ay si iskaa-wax-u-qabso wax ugu qabtaan ama ay bixiyaan sahayo halkii qoyska ay urjo ka bixin la'haayeen.

**Isku hagaaji lacagta kabka ee bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka si loogu xisaabiyo qarashka maciishadda ee maxalliga iyo 'da carruurta loo adeeggo.** Daryeel bixiyeyaasha ayaa waxay na la wadaageen in qarashka maciishadda ay ku kala duwan yihiin sumadda boostada (zip code) ka. Sicirka bixinta lacagta kabka waa inay ka tarjumaan kala duwanaanshaha qarashka maciishadda haddii ay tahay inay si caddaalad ah daryeel bixiyeyaasha.lacagtoo-da loo siiyo. Inta waxaa dheer, carruurta waaweyn iyo dhallaanka sabiga iyo kuwa socod-baradka ah labaduba waxay wakhti badan iyo ilooyin badan ay uga baahnaan karaan daryeel bixiyayaasha. Carruurta waaweyn waxay u baahan yihiin cunto badan iyo, gaar ahaan inta lagu jiro faafitaanka cudurka COVID-19, waqti dheeri oo lagu taageero markay ku jiraan waxbarashada qatka lagu bixiyo. Socod-baradka iyo sabiga waxay ku jiraan xilliga kobaca oo waxay u baahan yihiin feejignaan badan ee dhanka daryeel bixiyaha.

**In la kordhiyo xaddiga lacag-bixinta kabka ee loogu talagalay bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka.** Bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka waxay na la wadaageen in iyaga la siiyo lacag ka yar tan la siiyo shaqaalaha xarunta. Bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka inta badan saacado badan ayay shaqeeyaan wax-aana saaran waajibaad ka badan shaqaalaha xarumaha, oo kharashyadooda badankoodna loo ma soo celin. Waxay dareemayaan in farqigan yahay mid aan sinnayn, marka loo eego baaxadda shaqada ay qabtaan. Intaa waxaa dheer, farqiga u dhexeeya mushahar hoose ee la siiyo ee shaqada ay qabtaan iyo xirfaddooda oo la yaso.

**Wax ka qabashada soo dedejinta lacagta kabka.** Sidii hore loo soo wargaliyay, daryeel bixiyiyaasha waxay ku tiirsan yihiin lacagta la siiyo oo ay iskaga bixiyaan kirada oo ay u sii wataan meheraddooda daryeelka carruurta. Marka degmooyinka ama Barnaamijyada Lacag -bixinta Kale (Alternative Payment Programs (APs)) dib u dhigaan lacag -bixinta kabka, daryeel bixiyeyaasha ayaa waxay wajahaan caqabado. Lacag-bixin dib loo dhigay ayaa waxay qatar gelisaa in bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ay waayaan guryahooda, ay iska bixin waayaan cuntada iyo qarashaadka isticmaalka guriga, oo ayna dhib ku noqoto in qoysaskooda daryeeli waayaan.

**In la sameeyo isla xisaabtan ka sii badan si hay'adda R&Rs ay yeelato habdhaqanno cadaalad ah.** Bixiyaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ee Soomaalida ayaa na la wadaagay in R&R ay la xiriirtay qoysaska ay u adeegaan, isagoo weydiinaya haddii rabaan inay iska beddelaan daryeel -bixiyehooda. Tani sharci ma aha. Bixiyeyaash ayay ku kalliftaa inay laftoodu isku u doodaan oo waxayna u baahan yihiin dariiqyo in loo abuuro la xisaabtanka hay'adah R&R.

Daryeel bixiyeyaashu waxay rabaan nidaam daryeel ilmo oo ku xishmaynaya xirfaddooda iyaga oo ka qaybgelinaya waayo-aragnimadooda iyo in iyaga lagu taageero sida barayaal iyo barbaariyayaal

**Daryeel bixiyayaasha lagu taageero iyagoo la siinayo xafaayad, caanoboora-ha, iyo waxyaabaha kale ee daruuriga u ah qoysaska ay xannaaneeyaan.** Waqtigan xaadirka ah, daryeel bixiyeyaasha ayaa baahiyahan aasaasiga ah u ah qoysaska jaabkooda ugu soo iibiya. CDSS ayaa daryeel bixiyayaasha ku taageeri karta iyagoo uga faa'idaynaya ilaha dowladda gobolka si sahayadan loogu fidiyo.

**In loo fidiyo tababbaro dheeraad ah iyo ilooyin loogu talagalo daryeel bixiyayayaasha xanaaneeya dhalinta la korsado (fostor).** Bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ee Madowga iyo Latina waxay hoosta ka xariiqees waqtiga dheeriga ah iyo tababbarka dheeriga ah ee badanaa loo baahan yahay marka la daryeelayo dhalinta la korsado. Gaar ahaan, daryeel bixiyeyaashani waxay na la wadaageen in carruurta meelaynta guriga ka baxsan ku jira ay inta badan la kulmaan taraama, sidaas darteedna tababbar-ku-wargelinta daryeel bixiyayaasha ayaa sidaas darteed taageeri doonta awooddooda daryeelidda dhalinta la korsado. Intaas waxaa sii dheer, daryeel bixiyayaashu waxay na la wadaageen buuggaag dhaqameed iyo agab dhallinyaro ee kuwa daryeelkooda ku jira si ay uga caawiyaan inay wax badan ka bartaan aqoonsigooda jinsiyaddooda/qowmiyad-dooda. Daryeel bixiyeyaashu waxay ka faa'iideysan doonaan ilo dheeraad ah si ay u sii wanaajiyaan dhallinyarta ay u adeegyaan ee daryelekooda ku jira.

**In loo fidiyo deeqo dheeraad ah ee loogu talagalay cuntada dhaqammada carruurta.** Barnaamijka cuntada ma daboolayo kharashka buuxa ee ku baxa quudinta carruurta oo dhan, ama ma bixiyo cunto dhaqanka u gaar ah, daryeel bixiyayaasha xanaanada ilmaha ayaa lacagtooda ku kaba. Bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ee Soomaaliyeed, gaar ahaan, waxay sheegeen in xaddiga lacagta ay tahay (qiyaastii laba doolar maalintii, ubadkiiba) aysan ahayn mid ku filan in carruurta la siiyo raashinkii ay horey u barteen. Kharashaadka cuntada ayaa sii kordhay intii lagu jiray oo uu socday cudurka masiibada sababtoo ah kharashyada, carruurta da'da iskuulayda gaaray oo u baahan cunto badan, iyo adeegsiga adeegyada cuntada la isu keeno si looga fogaado in cudurka COVID-19 qofka soo gaaro.

**Meesha ka saar waraaqaha iyo caddayma-ha loo baahan yahay si loo lacagta loogu shaqeeyo ardayda haysta Qorshaha Waxbarashada Shaqsiyaadka (Individual-ized Educational Plans) ("IEPs").** Daryeel bixiyeyaashu waxay dareemayaan in waraaqaha IEP ga ee caddaynaya in ilmaha haysto qorshaha IEP ga (iyo inay sidaas darteed ku mutaysteen sicir dheeri ah inta ay daryeel bixinayaan) mar horeyba ayaa loo diyaariyay iyadoo loo soo maray nidaamyo kale. Kaas oo daryeel bixiyayaasha uga baahan inay buuxiyaan ama dhammaystiraan waraaqaha nuqulku kaas oo mid culus oo waqti-dheer ah uga baxa.

Daabacaadan waxaa la soo saaray iyada oo lala kaashanayo bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ee gobolka Kalifoorniya oo dhan ku baahsan iyo taageero maaliyadeed oo ka timid UrurkaSamafalka ee Walter S. Johnson Foundation, Price Philanthropies iyo Waaxda Adeegyada Bulshada ee Kalifoorniya.

Xarunta Sharciga Daryeelka Carruurta (Child Care Law Center) waxay waxbartaa, u dooddaa, oo ay u dacwootaa si daryeelka carruurta looga dhigo xuquuq shacab.



Lifaaqa 4aad

# Bixiyaha Daryeelka Caruurta ee Qoyska Soomaalida

Kooxda la-Tashiga ee Kooban

# Bixiyaha Daryeelka Carruurta ee Qoyska Soomaalida Ah Sookooba Koox La-Tashiga

### Waxa diyaariyey Shaqaalaha Cilmibaarista Xeelad Bulsheedka iyo Xarunta Xeerka Daryeelka Carruurta

Soo koobitaankani wuxuu ka soojeedaa aragtiyada iyo talooyinka shan iyo toban bixiyeyaal daryeel Carruur ah oo ka shaqeeya goobaha daryeelka carruurta oo iskgu jira kuwo waayan iyo kuwo yaryarba. Dhammaan bixiyeyaashu waxay ahaayeen haween Soomaaliyeed oo deggan San Diego, California.

Koox la-tashiga saarka waxa la qabtay Abriil 2021, iyada oo Af Soomaali lagu daaddihay oo lagu afceliyay Ingiriisi. Wada hadalka waxa lagaga hadlay mawduucyada soo socda: (1) Noocyada qoysaska carruurta ay u daryeelaan; (2) Taageerada ay fidiyaan qoysaska inta ka baxsan adeegyada daryeelka carruurta; (3) Taageerada ay jecel yihiin inay ka helaan gobolka si ay u hormariyaan adeegyadooda daryeelka carruurta; iyo (4) Talooyinka ay u soo jeedinayaan Waaxda Adeegyada Bulshada ee California (CDSS) si loo horumariyo nidaamka bixiyayaasha. Aragtiyada iyo talooyinka lagu wadaagay sookooban waxaa loogu talagalay in lagaga taageero CDSS qorshayntooda kalaguurka-kaddib ah.

## Dulmarka Kooxda La-Tashiga

Wada hadalka lala yeeshay kooxda la-tashiga ayaa ku bilaabmay bixiyeyaasha oo sifeyaynaya qoysaska carruurta ay u daryeelaan.  Guud ahaan, waxay siiyaan daryeelka carruurta kooxo qoys oo kala duwan oo badanaa dakhligoodu hooseeyo. Sida hoosta loogu sifeeyay, qoysaskani waxay ka soo jeedaan reero labadaba kuwo hal-waalid iyo laba-waalidba ka kooban oo leh xirfado kala duwan oo luqadeed.

## Qoysaska Carruurta leh ee Daryeelkooda Ku Hoos Jira

**Qoysaska badankood waa kuwo dakhligoodu hooseeyo oo waxay ka kooban yihiin kuwo iskugu jira hal-waalid iyo laba-waalid.** Qaar badan oo ka mid ah waalidiintani ma awoodi karaan gaadiidka oo waxayna ugu baahan yihiin taageero iska bixinta agabyada iyo adeegyada aasaasiga ah. Intaa waxa02222222 dheer, bixiyeyaasha ayaa sifeeyay in hooyooyin badan oo aan lammaane lahayn ay isticmaalaan adeegyadooda daryeelka carruurta oo ay qoysaskan gaar ahaan ay la kulmaan caqabado lacageed.

**Qoysaska badankoodu waxay isticmaalaan daryeelka carruurta ay dawladdu-fuundayso.** Maadaama inta badan qoysaska carruurta bixiyayaashu ay u daryeelaani u dakhligoodu hooseeyo, qaar badan oo ka mid ah ayaa isticmaala daryeelka carruurta ee ay dawladdu-fuundayso. Sidaa darteed, bixiyeyaasha ayaa ka hela inta badan lacag siintooda hay'adda kaydka iyo u soo gudbinta (R&R) ee daryeelka ilmaha deegaanka – YMCA iyo Shaqaalaha Kobaca Ilmaha (CDA).[1]

**Qoysasku waxay ku hadlaan dhowr luqadood oo kala duwan, oo ay ku jiraan Soomaali, Carabi, Faransiis, Sawaaxili, iyo Ingiriisi.** Qaar ka mid ah qoysaskan ayay aqoontooda Ingiriisi kooban tahay ama ku hadla kaliy Ingiriisiga. Sidaa darteed, bixiyeyaashu waxay dhex gooshaan luqado badan markay la macaamilayaan qoysaska carruurta daryeelkooda ku hoos jirta.

**Qoysas badan ayaa ha kuwo dhowaan soo haajiray.** Bixiyeyaasha ayaa sheegay in dhowr ka mid ah qoysaska ay dhex gooshayaan habsocodka socdaalka, iyagoo dhowaan yimid Mareykanka. Bixiyeyaasha qaarkood ayaa sheegay inay laftoodu soo mareen habsocodka socdaalka oo ay garan karaan dareenkooda qoysaskan.

**Qoysasku waxay u baahan karaan daryeel carruur saacadaha aan caadiga ahayn, oo ay Sabtida iyo Axaddu ka mid tahay.** Marka la sifeynayeen saacadaha caadiga ah ee daryeel

[1] In kasta oo Barnaamijyada Bixinta Fursadda Kale ah (APs) ay u siideyso bixiyeyaasha biximaha kaabka ah, APs ayaa badanaa ku taal isla dhismaha R&R oo sidaa darteed bixiyeyaasha ayaa ku tilmaama in ay R&R bixiso lacagaha.

bixiyayaashu ay u daryeelaan carruurta, dhowr ayaa sheegay inay bilaaban horay ahaan illaa 8 a.m. (subaxnimo), iyaga oo bixiyeyaasha qaarkood ay soo afjaraan shaqadooda 11 p.m (habeenimo). Saacadahan dabacsan ayaa loogu talagalay sidii loogu waafajin lahaa jadwallada shaqada waalidka, kuwaas oo intooda badani ayna caadi ahayn.

**Waalidiinta qaarkood ayaa ah ardayda laftooduba**. Ka sokow haysashada carruur dhigata dugsiga, waalidiinta qaarkood ayaa iyaguna dhigta dugsi. Waalidiintani kama shaqeeyaan shaqooyin waqti buuxa ah oo sidaa darteedna waxay u baahan yihiin taageero lacageed oo dheeraad ah iyo kharshyo ay ku bixiyaan baahiyaha aasaasiga ah.

### Taageerada Bixiyaha ee Qoysaska ee Dheeraakua Ku ah Daryeelka Carruurta

Bixiyeyaasha ayaa badiyaa si ka badan wax ugu qabta qoysaska halkii ay ku ekaan lahaayeen daryeelka carruurta kaliya. Bixiyeyaasha ayaa muujiyaya inay wada dhaqan u abuurmaan iyaga iyo qoysaskan oo ay ku kalifto inay inay taageeraan si ka baxsan u daryeelidd carruurtooda kaliya. Mawduucyada muhiimka u ah qaybtan wadahadallada la xiriira qaybaha soo socda: (1) Badbaadka COVID-19; (2) Taageeridda Baahiyaha Aasaasiga Qoysaska; (3)Siinta Gargaarka Maaliyadeed ee Qoysaska; iyo (4) Wax ka qabashada Baahiyaha Dadyowag U-Gaarka ah.

### Badbaadada COVID-19

**Muddadii lagu jiray COVID-19, bixiyeyaasha ayaa taageerayay barashada fogaanta ah.** Bixiyeyaashu waxay u daryeelayaan carruur ka sii badan oo gaadhay da'da dugsiga muddadii safmareenka taas oo u baahnayd daryeel hal-ka-hal ah oo ka sii badan sidii hore. Gaar ahaan, bixiyeyaasha ayaa waqti ka sii badan waayadii hore u qaadanaya mid kasta oo ka mid ah carruurta ku jirta daryeelkooda si loo hubiyo inay si habboon u dhammaystiraan waxqabadyada waxbarashada fog iyo hawsha casharka ee guriga. Sidaa awgeed, bixiyayaashaayaa dareema inay hadda ka qaybqaataan doorar kala duwan, oo ay ka mid yihiin ahaan: macallin, bixiye adeeg, nadiifiye guri, iyo ka caawiye waxbarasho. Bixiyeyaasha ayaa waliba muujiyay in carruurta ku jirta daryeelkoodu ay inta badan leeyihiin baahiyo waxbarasho shaqsiyeed taas oo u baahan kaalmo iyo waqti dheeraad ah inta lagu jiro wax ka barashada fogaanta.

**Jiritaanka safmareenka awgeed, bixiyeyaasha ayay nadiifintu waqti ka sii badan sidii hore ka qaadataa oo cuntada iyo agabkuna lacag ka sii badan kagaga baxaan.** Sida lagu sheegay xigashada soo socota, safmareenka ayaa abuuray kharashyo dheeraad ah si looga hortago faafitaanka COVID-19. Bixiyeyaasha ayaa badanaa jeebkooda ka bixiya iibsiga qalabka ilaalinta shaqsiyeed (PPE) iyo heerkulbeegyada, oo iyaguna noqday kuwo aad qaali u ah. Bixiyeyaasha ayaa ku qiyaasay inay ku bixiyeen in ka badan $1,000 agabka nadaafadda ku lug leh cudurka-COVID.

> *Waxaan kharash dheeraad ah ku bixiyaa agabka nadiifinta si aan uga hortago in u safmareenku ku dhaco crruurta. Waxaan soo iibiyaa waxyaabo badan, sida agabyada masaxa, gacmo cayayaan ka dilaha, maaskaraha, sheyada guriga lagu nadiifiyo. Labadii sano ee la soo dhaafay, waxaan wax badan ka qabannay ka hortagga faafitaanka cudurka, oo waxaan istcimaalnnay kala fogaantaynta bulshada iyo habab kale oo ayay nagag abaxaeen lacag aanan horay u soo arag oo aan jeebabkayaga ka bixinno.*

### Taageeridda Baahiyo Aasaasiga Qoysaska

**Bixiyeyaasha ayaa soo iibiya waxyaabha daruuriga ah iyo agabyo loogu talagalay qoysaska carruurta ay u daryeelaan.** Tusaale ahaan, bixiyeyaasha ayaa muujiyay inay u soo iibiyaan waxyaabaha soo socda qoysaska: xafaayado, boorsooyinka dhabarka lagu qaato ee ee dugsiga, dhar, iyo caano foormulada carruurta. Taageerada dheeraadka ah qoysasku aad uga mahadceliyeen. Hase yeeshe, bixiyeyaasha ayaa ku qiyaasay inay ku bixiyaan marka loo qaybiyo laba qayb dakhligooda bixinta kheyraadkaas. Guud ahaan, bixiyeyaasha ayaa raba inay hubiyaan in carruurta daryeelkooda ku hoos jira baahidooda

aasaasiga la qanciyo oo ay haystaan agabyada ay ugu baahan yihiin inay koraan oo ay kobcaan.

**Iyadoo bixiyeyaasha qaarkood ay ka qaybqaataan barnaamijyada cuntada, bixiyeyaasha ayaa jeebka ka bixiya inta badan cuntada ay bixiyaan.** Bixiyeyaasha ayaa iska diiwaangeliyeen barnaamijyada cuntada iyaga oo u maray iskubiirka Jikaana iyo shaqaalaha Kobaca Ilmaha (Chicana Federation and Child Development Associates). Hase yeeshe, bixiyeyaasha ayaa sheegay in qaddarka cuntada la siiyo barnaamijyadan aanay caadi ahaan ku filnayn inay qanciso baahiyaha carruurta daryeelkooda ku hoos jira oo ay tahay inay ku kabaan soo iibsashada cuntadooda. Mid ka mid ah bixiyeyaasha ayaa sheegay inay inta badan la wadaagaan cuntooyinka "lategitaanka" qoysaska ay dhibka ku tahay inay iskood cunto u helaan.

**Bixiyeyaashu waxay siiyaan taageero gaadiid qoysaska aan marin u lahayn baabuur iyo/ama aan iska bixin karin shidaalka gaadiidka.** Markay tahay qoysaska qaarkood, bixiyeyaasha ayaa u soo qaada oo guriga ku celiya carruurta si ay u yareeyaan dhibka safarka ka haysta qoysaska carruurtoodu ku jirto daryeelkooda. Intaa waxa dheer, bixiyeyaasha ayaa bixin doona shidaalka gaadiidka si ay qoysasku carruurtooda u geeyaan guriga bixiyeyaasha. Adeegyadan iyo kharashyadan ayay bixiyeyaashu jeebkoodka ka bixiyaan.

> *Mararka qaarkood, waxaan la kulmaa hooyooyin ka ooyaya la'aanta lacagta shidaalka gaadiidka, oo waxaan u iibiyaa shidaal si ay carruurtooda u geeyaan guriga sababta oo ah waalidku waxay u badan yihiin waalidiin dakhligoodu hooseeyo oo aan iska bixin karin kharashyadooda maalinlaha ah. Dhammaan kharashyadaasi kuma jiraan mushaharkayga oo mararka qaarkood... Maadaama waalidiinta qaarkood aanay lahayn baabuur, oo ay ku nool yihiin meel ka fog goobta, iskuma hallayn karaan gaadiidka dadweynaha mar kasta.*

> *[D]akhligayga ayaa ka yaraa kharashyadayda. Macaamiishaydu waa qoysas aad sabool u ah, sidaa darteed, wax wax kstakuma dalli karo. Markaaa mararka qaarkood, waxaan arkaa hooyo ka ooyeysa maadama ay iska bixin kari weyday kharashadeeda bishii kasta ah, gaar ahaan kirada iyo biilasha kale ee daruuriga ah. Hooyadaa ooyeysaa waa qof macmiilkeyga ahayd oo aan ka dib saaxiib noqonay sannadihii dambe. Sababtaas awgeed, anigu iskama dhaafi karo waxaas oo dhibaato ah oo iyada haysta, markaa waxaan isku dayaa inaan ka caawiyo wax kasta oo aan karo, xitaa haddii ay tahay deeq yar.*

> *Mararka qaarkood, waalidiinta ayaa kuu soo wargalinaya inay soo socdaan oo ay qaadi doonaan ilmaha laakiinse waqti ka dib aan imanayn, markaa waan wacaa oo wey jawaabaan iyaga oo waddada ku jira waddada jooga oo baabuurkoodii waddada kaga damay shidaal la'aan. Markaa waxaan soo iibsadaa caagadda shidaalka baabuurta oo aan u geeyaa, markaa dhibaatooyin aad u fara badan ayay leedahay meheraddani. Waxaan dareemayaa in aannaan helin mushaar nagu filan, oo mararka qaarkoodna waxaan la hadlaa Ilaahay oo waxaan weyddiistaa inuu naga ka abaal mariyo dhammaan adeegyadan aan u qabanno macaamiishayada.*

**Daryeel bixiyeyaashu waxay hubiyaan inay carruurta daryeelkooda ku hoos jiraa helaan farxad iyo reyreyn noloshooda.**Gaar ahaan, hal bixiye ayaa noo sheegtay inay u qabanqaabiso xafladaha dhalashada carruurta ay daryeesho oo ay geyso safar dibadeed ay ku tagaan beeraha nasashada iyo goobaha ay carrurtu ku ciyaaraan.

### Siinta Gargaar Dhaqaale Qoysaska

**Bixiyeyaasha badanaa kuma dallaacan khidmadaha qoyska.** Daryeel bixiyeyaasha ayaa muujiyay inay ogyihiin in qaar badan oo ka mid ah qoysaska carruurta ku jira daryeelkooda aanay awoodi karin inay bixiyaan khidmadaha qoyska. Xitaa maba weyddiistaan qoysaska qaarkood inay bixiyaan sababta oo ah bixiyeyaasha ayaa og in qoysaskani ay la dhiibataysan yihiin kharashyada. Tusaale ahaan, hal bixiye ayaa sharraxay

in maadaama ay qoysaskeeda ay ka taageerto kharashka cuntada, aanay tixgalin suurtagalnimada inuu qoysku awoodi karo inuu bixiyo khidmadda qoyska. Bixiyeyaashan ayaa marka dambe kafaala qaata kharashka ay qoysaskani ku bixin lahaayeen khidmadaha qoyska.

### Wax ka qabashada Baahida Dadyowga-qaarkood

**Daryeel bixiyeyaasha ayaa qoysaska qaarkood ka caawiya habsocda socdaalka ama imigreeshinka iyo ballamaha kale ee muhiimka ah.** Gaar ahaan, bixiyeyaasha qaarkood ayaa muujiyay inay qoysaska geeyaan ballamaha socdaalka oo ay ka taageeraan buuxinta waraaqaha socdaalka. Iyagoo ogaaday in qaar badan oo ka mid ah qoysaskani ay yihiin muhaajiriin cusub oo u baahan taageero, adeeg bixiyayaasha ayaa walibana qoysaska gaadiid ku geyn doona ballamaha dhakhtarka iyo ballamaha kale ee muhiimka ah.

> *Waxaan u qabannaa dhammaan adeegyadaas macaamiishayada. Waan ognahay in hawshayadu ayna khusayn ballamaha dhakhtarkooda iyo waraaqaha ay ka heleen hay'adaha guriyaynta iyo samafalka,* ***oo qaarkood ayaa na weyddista caawimo, in la geeyo [Adeegyada Muwaaddinimada iyo Socdaalka Mareykanka] iyo ballamaha dhakhtarka iyo waxyaabahaas oo kale.*** *Maadaama, inta ugu badan, [aannu u adeegnno] muhaajiriinta cusub oo laga yaabo in aanay lahayn ama marin u heli karin nooc kasta oo gaadiid ah. Sidaa darteed, waxaan iyaga siinnaa taageero badan.*

**Markay yihiin bixiyeyaasha ku hadla Ingiriisiga iyo Soomaaliga labaduba, waxay inta badan u fidin doonaan taageero turjumaad/afcelin qoysaska ay carruurta ku hoos jira daryeelkooda**

Bixiyeyaashan ayaa muujiyay inay inta badan ku taageeri doonaan qoysaska ku hadla Af-Soomaaliga waraaqo loogu talagalay dheefaha gobolka ama codsiyada shaqada.

> *Anigu ku ka taageeraa carruurta iyo waalidkoodba adeegyada tarjumaadda. Mararka qaarkood waxay ii keenaan waraaqo iyo foomam loogaa soo diray hay'ado kale, sida samafalka, adeegyada bulshada, dhakhaatiirta, foomamka shaqada iyo degmo dugsiyeedka oo aanay fahmi karin ama buuxin karin. Markaa waxaan ka caawiyaa inay fahmaan oo aan u buuxiyaa foomamkaas. Waxaan sidoo kale ka caawiyaa sidii ay u heli lahaayeen kheyraad kale iyo sidii ay shaqo u heli lahaayeen iyo wixii la mid ah.*

**Iyada oo ay jirto in qoysas badani shaqeeyaan saacadaha aan caadiga ahayn, bixiyeyaasha ayaa markaa u dheerayn doona saacadahooda shaqada ee caadiga ah.**

Qoysasku waxay leeyihiin jadwallo kala duwan iyada oo ku xiran kolba xaaladda shaqo. **Oo**, qoysaska qaata gaadiidka dadweynaha, ayaa inta badan ka soo daaha qaaditaanka carruurtooda oo sababtuna tahay nidaamka baska oo aan la isku hallayn karin. Sidaa awgeed, adeeg bixiyayaasha ayaa inta badan horay u bilaaba adeegyadooda oo joojiya waqtiyo ka dambeeya saacadaha shaqada "caadiga" ah oo badanaa aan ugu dallacin lacag qoysaska waqtiga dheerka ah. IntaA waxa u sii dheer, bixiyeyaasha qaarkood oo u fidiya daryeelka Sabtida iyo Axadda qoysaska shaqeeya maalmaaas.

## Sidee ayay CDSS u Taageeri kartaa Bixiyeyaasha

Taageerooyinka dheeraadka ah ee bixiyayaashu ay hawsheeda qabataan, ayay daryeel bixiyayaashanala wadaageen baahiyo gaar ah oo ka caawiya iyagu inay horumariyaan kartidooda ay ugu daryeelaan carruurta iyo qoysaska carruurta ee dayeelkooda ku hoos jira. Mawduucyada muhiimka ah ee ku saabsan: (1) Ka Gargaarka COVID-19; (2) Khayraadka Dheeraadka ah ee loogu talagalay Carruurta iyo Qoysaska; (3) Wada Xiriirka iyo xirfad-yaqaanaynta; iyo (4) Tababbaritaanka.

### Ka Gargaarka COVID-19

**Bixiyeyaasha ayaa u baahan taageero dheeri ah oo ay ku qanciyaan kharashyada dheeraadka ah ee ka yimid COVID-19.** Dhawr bixiye ayaa muujiyay inay heleen deeqda

daryeelka carruurta iyo sahayda intii lagu jiray safmareenka. Hase yeeshe, sida lagu muujiyey xigashada soo socota, deeqahaas iyo agabyadu kuma filnayn inay qanciyaan dhammaan agabka dheeraadka ah ee loogu baahan yahay in naftooda, carruurta, iyo qoysaskaba loo badbaadiyo intii lagu jiray safmareenka. Bixiyeyaasha ayaa ka warbixyay inay ku kharash aan u bixiyaan inta u dhexeysa $900 illaa $1,800 bishii kasta si ay u nadiifiyaan guryahooda oo ayna ugu hoggaansamaan shuruudaha COVID-19 ee u ruqsadaynta.  Intaa waxa dheer, mushaharka ay heelaani kuma filna inay qanciso kharashyada soo biiray ee COVID-19 oo waxayna ku dambeysaa bixiyeyaasha oo hela lacagta ugu yaraanta ah. Waxaa intaa dheer, bixiyeyaasha ayaa dareemayaan inay u baahan yihiin shaqaale intaa ka sii badan si ay uga caawiyaan waqtiga nadiifinta ee lagu daray iyo waqtiga qof-ka-qofka ah, laakiin ma haystaan ilo dhaqaale oo ay ku shaqaaleysiiyaan shaqaale badan.

> ***COVID-19 wax kasta wuu beddelay.*** *Deeqda aan helnay xataa kuma filna hal maalin. Waa inaan aad u sheqayno si aan uga hortagno faafitaanka cudurka. Waa inaan mar kasta nadiifinnaa meel kasta-- musqulaha, jikada, qolalka fadhiga iwm. Maalin dhowayd, waxaan tagay dukaanka Restaurant Depot si aan u soo iibiyo agabkii nadiifinta oo waxaan kaydiyay rasiidhkii, maxaa yeelay waxaan rabaa inaan intaan muraayad dhex galiyo sida sawirka aan dhejiyo si aan u tuso inta aan ku bixinno nadaafadda iyo siduu COVID-19 u beddelay qaabka noloshayada.*
>
> *Waxa intaas ka sii daran inay na siiyaan mushaharka lacag bixinta ugu yar. Haddii aad si dhab ah u xisaabiso xaddiga waqtiga iyo dadaalka aan gelino carruurta iyo kharashyada naga baxa, gaar ahaan xilligan safmareenka ee aan u iibsanno agabyo badan oo jermiska dila oo loogu talagalay nadaafadda iyo waxyaabo kale. Waxaas oo dhan [kharashyo ah], waxaa suurtagal ah in la i siiyo kaliya $ 600-700 bishii. Tani waa dakhliga usbuucii ay helaan dad badan oo ka shaqeeya meelo kale. Cadaalad ma aha.*

## Ilo Dheeraad ah oo loogu talagalay Carruurta iyo Qoysaska

**Daryeel bixiyeyaasha ayaa ugu baahan taageero dheeraad ah siinta cuntooyinka carruurta ku jirta daryeelkooda.** Daryeel bixiyeyaasha ayaa sheegay inay u baahan yihiin lacag ka sii badan si ay u wax uga qabtaan kharashka cuntada ee carruurta ay u daryeelaan. Bixiyeyaasha ayaa sheegay in ayna hadda haysan cunto ku filan oo hay'aduhu lacagta ay dib ugu soo celiyaani ay wax ka tarto kaliya qiyaastii rubuc ahaan kharashka. Waxaa intaa u dheer, cuntadu waa inay noqotaa mid caafimaad iyo tayo sare leh, oo raacda dhaqannada carruurta, sida lagu sifeeyay xigashada soo socota.

> *Waxaan u baahanahay tababbar iyo tababbarayaal fahansan dhaqannada iyo caadooyinka. Tusaale ahaan, lacagta qadadu waa $2 iyo dhowr senti. Taasi waa qiimaha jiis sanwij oo ah cunto aan u habboonayn carruurta Soomaaliyeed maxaa yeelay canuggu ma cuni doono. Markaa waxaa loo baahan yahay inuu jiro tilmaan cad oo ku saabsan cuntooyin dhaqameedka iyo qiimaha cuntooyinkaas.*

**Daryeel bixiyeyaashu waxay u baahan yihiin in laga taageero xagga ka caawinta qoysasku inay iska bixiyaan khidmadahooda qoyska.**

Daryeel bixiyeyaasha ayaa muujiyay inay si joogto ah lacagtu ku yaraato maadaama ayna qoysasku bixin karin khidmadaha qoyska. Sidii horeba loo sifeeyay, adeeg bixiyayaal badan ayaan qoysaska weyddiisan inay bixiyaan khidmadaha sababta oo ah waxay og yihiin in qoysaskani aanay awoodi karin bixinta. Sidaa darteed, adeeg bixiyaha ayaa marka dambe helo mushahar dhiman oo ugu tiirsanaada R&R inay bixiso lacag biximo waqtigeeda timaad oo sax ah.

## Wada Xiriirka iyo Xirfad-yaqaanaynta

**Bixiyeyaasha ayaa ugu baahan taageero inay la xiriiraan hay'addooda R&R ee ugu dhow**. Bixiyeyaasha ayaa lmuujiyay inay hay'adda R&R dhibaato ka haysato habsocodsiinta biximaha iyo kala xiriirka shati ruqsadaynta. Gaar ahaan, bixiyeyaasha ayaa muujiyay inay marar badan helaan lacag bixinta oo soo daahda iyo in aan sax ahayn ah.

Maadaama ay bixiyeyaashu ku tiirsan yihiin lacag biximahan si ay iskaga bixiyaan kirada iyo biilasha,lacag bixinta oo soo daahda iyo in aan sax ahayn ah ayaa caqabado badan dhalinaya. Intaa waxa u dheer, bixiyeyaasha oo nala wadaagay in hay'adda R&R ay isku dayeen inay xakameeyaan saacadaha ay shaqeeyaan meheradahoodu oo ay mararka qaarkood, ugu hanjabeen inay ka qaadi doonaan ruqsadda. Sidaa awgeed, bixiyeyaasha aay u baahan taageero ay kula xiriiraan hay'adooda R&R si loo hubiyo lacag bixin waqtigeeda timaad oo qaddar sax ah iyo habdhaqanno meherad oo cadaalad ah.

*Tusaale ahaan, waxaad haysaa hal qoys carruurtooda oo anigana meel bannaan ayaa la iga heli karaa, waxayna iga codsadaan inaan bixiyo saacadaha shaqada. Markaa waxay igu dirqiyaan inaan beddelo saacadaha aan hawlgalo. Tani waa meheraddayda oo waxaan rabaa in aan meheraddayda u maamulo sidaan rabo, markaa waa inay noo ixtiraamaan si aan u furanno oo aan u xiranno goobtayada saacadaha aan dooranno... Waxaan u baahanahay xorriyad aan ku maamulo meheraddayda aniga oo aan weyddiisan oggolaansho cid kale. Anigu ma rabo inayin hay'ad ii sheegto inaan buuxiyo hawlo waraaqo yar oo ku saabsan sidii aan u socodsiin laahaa goobtayda. Marka waxaan u baahannahay inuu gobolka California uu soo dhex galo arrinta, oo u naga difaaco hay'adahan si aan u hubinno inay hay'adahani raacaan xeerarka iyo qawaaniinta gobolka.*

**Bixiyeyaasha ayaa u baahan in laga taageero xagga xirfad-yaqaanaynta noocan hawlaha**. Bixiyeyaasha ayaa muujiyay inay dareemaan in hay'adaha R&R iyo deegaankuba (county) "ay hoos noo dhigaan" oo ayna ula dhaqmin si xirfad-yaqaanimo leh. Gaar ahaan, markay bixiyeyaasha ay soo bandhigaan arrimo ama waxyaabo k walaac ku saabsan dhaqannada hay'adda R&R, bixiyeyaasha looma tixgeliyo inay dhab ka tahay. Deeeganku (county) wuxuu u hiiliyaa hay'adda R&R waxayna diidaan caddeynta bixiyaha.

### Tababbaritaanka iyo Horumarinta Xirfad-yaqaanimada

**Bixiyeyaasha ayaa ugu baahan tababbar maamulitaanka meheradda iyo ujeeddooyinka iyo xeerarka daryeelka carruurta.** Bixiyeyaasha ayaa muujiyay inay ugu baahan yihiin taageero dheeri ah gaarashada sida loo maareeyo meheraddooda. Gaar ahaan, bixiyeyaasha ayaa jeclaan lahaa inay si ka sii qoto dheer u fahmaan xeerarka iyo qawaaniinta saameynaya bixiyeyaasha daryeelka carruurta oo marka iyagu laftoodu is doodaan marka loo baahdo.

**Daryeel bixiyeyaashu waxay u baahan yihiin goobo iyo tababbarro ka caawiya maareynta cadaadiska (stress) iyo taraamada la xiriirta daryeel-bixintooda.** In kasta oo bixiyeyaasha qaarkood ay sheegeen inay ka qaybgaleen tababbaritaanno la xiriira meheradda si ay u taageeraan meheraddooda daryeelka carruurta, ma aanay helin wax tababbaritaanno ah oo la xiriira maareynta cadaadiska ama taraamada. Bixiyeyaashu ayaa muujiyay inay si joogto ah ula kulmaan oo ay markhaati u noqdaan cadaadiska ama taraamada xagga shaqadooda ha sidaas darteedna ay ugu baahan yihiin taageero maareynta cadaadiska shaqada.

*Annagu aanaan qaadan wax fasallo ah oo la xiriira maareynta cadaadiska oo runtii waxaan u baahanahay fasalladaas bixiyeyaal ahaan. Waxaan u baahanahay fasallo lagu yareeyo cadaadiska, maxaa yeelay maalinta oo dhan waxaan ku jirnnaa xaalad cadaadis badan. Waxa kaliya ee ay na siiyeen ayaa ahaa fasallo la xiriira arrimaha meheradda laakiin waxaan u baahanahay fasallo la xiriira adeegyada la macaamilka dadka iyo habdhaqanka ah. Waxaan u baahannahay inaan isuku nimaadno oo aan ka wada hadalno dhibaatooyinkayaga... waan ilownaa nafteenna, oo waxaan sameyno oo dhanna waa shaqo. Waxaan u baahanahay inaan qaadanno casharro yareeya cadaadiska oo na siiya nefis iyo nasasho.*

### Waxay Kala Soo Kulmeen Ogeysiisyada Macluumaadka Biixiyaha (PIN)

Guud ahaan, bixiyeyaal badan ayaa muujiyay inayna fahmin Ogeysiisyada Macluumaadka Biixiyaha (PIN) sababta oo ah laguma turjumin Af Soomaali. Si aad u hesho macluumaadka ugu dambeeyay ee ku saabsan ujeeddooyinka iyo ogeysiisyada la xiriira

daryeelka carruurta, bixiyeyaashu haddaba waa inay helaan qof ka caawiya u turjumaadda Ingiriisiga afka Soomaaliga. **Bixiyeyaashu waxay ka codsanayaan CDSS inay si degdeg ugu turjumto dhammaan Ogeysiisyada Macluumaadka Biixiyaha (PINs) oo ay ku bixiyaan tababbaritaanno Af Soomaali si ay iyaga laftoodu iskugu doodaan, sida lagu sifeeyay xigashada socota.**

> *Waxaan rabnnaa inay nagu tababbaraan afka Soomaaliga oo ay dhegeystaan fikraddayda. Haddii ay nagula soo xiriraan Af Soomaali, waan fahmi karaa xuquuqdayada oo waxaan qori karnnaa fikrado iyo cabashooyin. Waxaan kulan kula yeelan karnnaa waaxda adeeg bulsheedka koox ahaan. Waxaantabanayno waxaan ugu sharaxnaa kaliya Af Soomaali laakiin ugu seegi karno Af Ingiriisi aad fiican. Hadda waxaan la xiriiri karnnaa ururka shaqaalaha, waayo waxaan haysannaa qof Af Soomaali ku hadli kara oo nala hadli kara... Soomaali haddan nahay waxaan ahayn dad inta ugu badan ku wada xiriira hadalka oo waa sidaas is afgaradkayagu.*

### Talooyinka ay Daryeel Bixiyeyaashu u soo jeedinyaan CDSS

Marka la eego arrimaha mawduucyada muhiimka ah ee soo baxay intii lagu jiray la hadalka kooxda-latashiga, bixiyeyaasha ayaa bixiyay talooyin ku saabsan ka sii fiicnaynta nidaamka daryeelka ilmaha, sida hoosta ku kooban.

#### In La Hubiyo Marin u Helitaanka Luqadda iyo Ka-Qaybgalinta

1. **In lagu siiyo tababbaritaanno bixiyeyaasha daryeelka carruurta afka Soomaaliga** si dhammaan bixiyeyaashu, iyada oo aan loo eegayn luqadda ay ku hadlaan, ay marin ugu helaan macluumaadka ugu dambeeyay ee ku saabsan ujeeddooyinka daryeelka carruurta iyo xeerarka iyaga saameeya.

2. Ogeysiisyada CDSS ee hadda jiraa ma leh Soomaali; sidaa darteed, bixiyeyaasha ayaa ku talinaya in CDSS **ugu turjumaan af Soomaali dhammaan agabyada la-xiriira bixiyaha.**

#### In la Hirgaliyo Isla Xisaabtanka iyo Ku Dhaqannada Caddaaladda

3. **In loo abuuro isla xisaabtan ka sii badan hay'adda R & Rs** si loo helo habdhaqanno cadaalad ah. Tusaale ahaan, bixiyeyaasha ayaa soo wargaliyay in hay'adda R&R ay u yeereen qoysaskooda oo ayna weyddiiyeen inay rabaan in ay iska beddelaan bixiyehooda, taas oo aan sharci ahayn. Bixiyeyaash ayay ku kalliftaa inay laftoodu isku u doodaan oo waxayna u baahan yihiin kheyraad iyo habab loo maro ka caawinta in loo abuuro la xisaabtanka hay'adah R&R.

4. **Wax ka qabashada soo dedegga lacag biximaha deeqaha**. Sidii hore loo soo wargaliyay, bixiyeyaashu wayaa ku tiirsan lacag biximaha deeqda ah ee ka timaad ha'adaha R&R si ay iskaga bixiyaan kirada oo ay u sii wataan meheraddooda daryeelka carruurta. Sidaa darteed, marka dib ugu celinnadu ay soo daahaan ama ay qaadato waqti dheer in la hab socodsiiyo, bixiyeyaasha ayaa la kulma caqabado.

5. **In laga dhigo saamiga dib ugu celinta mis ku saleysan sumadda boostada (zip code)**. Bixiyeyaasha ayaa soo wargaliyay waxay in qiimaha maciishaddu ay ku kala duwan yihiin sumadda boostada. Sidaa darteed, saamiga dib ugu celintu waa inuu muujiyo kala duwanaanshahaas dhianca qiimaha maciishadda in si cadaalad leh dib loogu celiyo lacta bixyeyaasha.

#### In Loo Eego Kala Horreysiinta Fayaqabidda Bixiyayaasha

6. **In la siiyo gargaar lacageed oo dheeraad ah bixiyeyaasha iyo qoysaska, gaar ahaan markay tahay ka soo kabashada safmareenka**. Marka la eego waqtiga dheeraadka ah iyo lacagta ay bixiyeyaashu kharash gareeyeen intii lagu jiray safmareenka, oo ay u weheliso dhibaatada dhaqaale ee qoysas badan la soo wajahday intii lagu jiray COVID-19, bixiyeyaasha iyo qoysaska ay carruurta

daryeelkooda ku hoos jiraan ayaa u baahan gargaar lacageed oo dheeraad ah. Gargaarkaan lacageed ayaa ugu iman kara qaab lacag mushahar oo ka sii badan ah oo la siiyo bixiyayaasha, iyo lacag deeq dheeri ah si loo qanciyo kharashyada la xiriira COVID-19, iyo in laga dhaafo khidmadaha qoyska.

7. **In la Bixiyo fuundo dheeri ah oo loogu talagalay cuntada oo taageertana dhaqammada carruurta**. Barnaamijyada cuntada ee hadda jira kuma filna inay qanciyaan kharashka buuxa ee cuntada, gaar ahaan ta carruurtaas aad ay ugu cuntamaan cuntooyinka dhaqanka-u-gaarka ah.

8. **In loo sameeyo goobo ay bixiyeyaashu midba midka kale ay isku taageraan**. Marka la eego cadaadiska soo raac a ahaanta dareeyl bixiyaha, bixiyeyaashu waxay ka faa'iidaysan karaan inay yeeshaan tababbaritaanno ama goobo loo talaglo inay midbamidka kale isku taageeraan fayaqabkooda.